
# Birisam-saameynta iyo qaloocsanka falaaraha ileyska

Ilaysku waa falaaro ka imaanaya il-ileys dhalisa. Tusaale ahaan qoraxdu waa il-ileys dhalisa.

Ileyska qoraxdu waa caddaan. Ileyska caddi waxa uu ka koobanyahay midabadda aan arki karno oo dhan. Gaduud, Oranjo, Jaale (huruud), Cagaar, Buluug, Khal/indigo iyo Basali/fiolett(ROGGBIF) waa todobada midab ee indhaheenu arki karaan, midabadas oo isku ah hal urur- midabeed. Urur-midabeedkaas


waxaan arki karnaa marka ilayska la jabiyo, tusaale ahaan haddii ileys cad lagu ifiyo ama la dhex mariyo birisam. Waxa kale oo urur-midabeedka aan arki karraa marka ilayska uu ku jabo dhibic biyo ah. Sidaa darteed ayeynu u aragnaa qaanso- roobeedka marka qorrax jirto, isla makaana roob da`ayo.





Falaaraha qoraxdu waxa ay u dhaqaaqaan sida hirarka, midabada kala duwan waxa ay leeyihiin hirbaacyo kala duwan. Hirbaac waa masaafada u dhaxaysa laba taag-mowjadeed ama laba sal-mowjadeed. Falaaraha ilayska ee aan indhaheena ku aragno(ilayska muuqda)

masaafadhiisu aad ayey u yartahay, waxa ay u dhaxaysaa 390 iyo 730 nanometer(nm).

Midabka guduudka ayaa leh hirbaaca ugu dheer. Fiolett kana waxa uu leeyahay hirbaaca ugu gaaban. Lahaansha ay leeyihiin hirbaacyo kala duwan darteed ayaa midabadu ay ku jabaan baro kal gadisan. Taas oo keenta in kala horeynta midabada ay mar kasta isku mid yihiin. Sidaa darteed ayaa qaansaroobadu mar walba ay iskugu egtahay, oo gaduudku u sareeyaa, basaliguna(fiollet) ugu hooseeyaa.




Midabadu waa nooc ka mid ah falaaraha ileyska. Sidaa darteed waxa aan u baahanahay ileys si aan wax u aragno. Marka ileys cad oo ka yimid qoraxda uu ku dhaco shey, tusaale ahaan funaanad, qeybo kamida ileyska ayaa dib usoo noqda. Soo noqoshada waa marka ileysku dib u soo noqdo. Qeybaha ileyska aan soo noqon waa la nuugay. Waxaana loogu yeeraa nuugis. Midabka aan ku aragno indhaheenu waa falaarihii ilayska ee soo noqday. Haddii aan aragno funaanad cagaar ah, sababtu waa ilayskii cagaarka ahaa ayaa dib u soo noqday. Falaaraha ilayska intoodii kale funaanadda ayaa nuugtay. Haddii ay funaanadu madowdahay sababtu waxa weeye falaarihii ilayska oo dhan ayaa la nuugay. Haddii funaanaddu caddaan tahay sababtu waa falaarihii ileyska oo dhan ayaa soo noqday.



## Goobo geli ta saxda ah

Waa midabkee ilayska qoraxda ka yimaad?

- Jaale
- Bluug
- Cadaan

Maxaan aragnaa ama samaysma marka ilayska qorraxda ay jabiyaan dhibco biyo ah?

- Jeegaano fara badan
- Waxba ma aragno
- Jeegaan

Waa maxay soo noqodka ilaysku?

- In la isticmaalo ilays soo celiye

- Falaaraha ilayska ayaa dib loo soo celinayaa
- Falaaraha ilayska dib looma soo helinayo

Waa maxay nuugid?

- Falaaraha ilayska oo dhan ayaa dib loo soo celiyey
- Falaaraha ilayska oo dhan ayaan dib loo soo celin
- Waa erey kale oo loogu yeero ilayska la arko.

Sidee ayaan ku aragnaa funaanad in ay cad tahay?

- Falaaraha ilayska oo dhan waxa nuugta funaanada
- Falaaraha ilayska oo dhan waxa soo celisa funaanada